IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 30 Maajo 1981 L. 3 R 5

*FAAFINTA BIL SOO BAXA*

يدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

**QIIMAHA** : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Sooma gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wà laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Ra ga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcag

## KO OBNIIN

## QAYBTA KOOWAAD

## S H A R C I


SHARCI L. 27 ee 31 Maarso 1981. Oggolaansho heshiis dhexmaray JDS iyo Ururka Horumarinta Caalamiga (IDA) kuna saabsan Mashruuca sahminta Batroolka. — Bogga

SHARCI L. 27 ee 5 Abriile 1981. Meel marin heshiis. — 806

LAW No. 27 on 5th Abril 1981. Instrument of Ratification. — 808

SHARCI L. 28 ee 25 Abriile 1981. U Rogid Sharci Rasmi ah Xeer Sharci L. 1 ee 31 Maarso 1981, kuna saabsan baabi'inta Wakaa. G. Alaabta Dhismaha. — 809


WAKAALADDA M. QARANKA

SHARCI L. 29 ee 25 Abriile 1981. U Rogid Sharci Rasmi ah Xeer Sharci L. 2 ee 31 Maarso 1981, kuna saabsan baabi'inta Wakaaladda Ganacsiga Dharka iyo Maacuunka. 810

SHARCI L. 30 ee 25 Abriile 1981. U Rogid Sharci Rasmi ah Xeer Sharci L. 3 ee 31 Maarso 1981, kuna saabsan baabi'-inta Wakaa. Horumarinta Xoolaha. 811

SHARCI L. 31 ee 28 Abriile 1981. Dib ugu celin Dawladda Dhexe maamulka faa'-idada daaraha. 812

SHARCI L. 32 ee 28 Abriile 1981. Hawsha Difaaca Qaranka. 813

SHARCI L. 33 ee 28 Abriile 1981. Sharci-ga Abaalmarinta C.Q.S. 814

SHARCI L. 34 ee 28 Abriile 1981. Sharci-ga Dallacaadda Saraakiisha. 814

SHARCI L. 35 ee 30 Abriile 1981. Mash-ruuca Warshadda Shimiintada Berbera 818

SHARCI L. 35/bis ee 18 Maajo 1981, Shar-ciga Baasaboorada iyo Warqadaha Dhoofidda. « 843

## QAYBTA LABAAD 830

## X E E R

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS L. 11 ee 28ka Abriile 1981. U go'id hawlaha Golaha Sare ee Kacaanka. 839

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS L. 12 ee 13 Maajo 1981. Laalid dacwooyin-ka Ijaarka Guryaha ganacsiga. 844

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS L. 13 ee 14 Maajo 1981. Dheereen muddo cafis. 854

SHARCI L. 27 ee 31 Maarso 1981.
Oggolaansho heshiis dhexmaray JDS iyo Ururka Horumarinta Caalamiga (IDA) kuna saabsan Mashruuca Sahminta Batroolka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday heshiis dhexmaray JDS iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah kuna saabsan amaah lacageed oo dhan 6.000.000, doollarka Mareykanka ah looguna talagalay sahminta Batroolka.

2. Heshiiska waxaa lagu saxiixay WASHINGTON D.C., ee dalka Mareykanka taariikhdu markay ahayd 7 Nofembar 1980.

3. Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa sharcigan isagoo lifaaq u yahay.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada heshiiska lagu soo tilmaamay Qod. 1aad ee Sharciga, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan Sharci la heer ah Sharciyada iyo xeerarka Dalka, dhaqan gelitiinsu waxaa la waafajinayaa Qod. 72 (I) ee Dastuurka iyo qodobada uu ka saameeyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey in uu meel mariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman sida uu qabo Qod. 82aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada iyo xeerarka Dalka wuxuuna dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 31 Maarso 1981.

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 27 ee 31 Maarso 1981.
Meelmarin Heshiis.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY: Qodobka 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad, Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka JDS.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Amaahda lam. yahay 104380 ee «Mashruuca Sahaminta Batroolka» dhexmarayna Dawladda JDS iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumairnta (IDA) laguna kala saxeexday Degmada Koloombiya ee dalka Mareykanka 7dii Noofembar, 1980.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga ee heshiiska aan soo sheegnay taariikhdiisuna ahayd 31kii Maarso 1981.

Wuxuu soo saarayaa Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Heshiiska Amaahda lam. yahay 104380 ee «Mashruuca Sahaminta Batroolka» dhexmareyna Dawladda JDS iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta «IDA» laguna kala saxeexday Degmada Koloombiya ee dalka Mareykanka 7dii Noofembar 1980, waa la meelmariyey.

Qod. 3aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelan doona JDS astaan sharci ah wuxuuna dhaqan gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha JDS.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Maarso 1981.

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

LAW No. 27 on 3th March 1981.
Instrumen tof Ratification.

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

The President

HAVING SEEN: Article 67 (5), Article 82 (4) and Article 72 (1) of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Loan Agreement No. 104380 «for the Project of the Petroleum Exploration Promotion» between the Government of the Somali Democratic Republic and the International Development Association (IDA), signed at the District of Columbia, US, on 7th November 1980.

TAKING NOTE: Of the approval of the People's Assembly o fthe said Agreement dated 31st March 1981.

Hereby promulgates the following Law:

Article 1

The Loan Agreement No. 104380 for the Project of the Petroleum Exploration Promotion, between the Government of the Somali Democratic Republic and the International Develpoment Association «IDA», signed at the District of Columbia, USA, on 7th November, 1980, is hereby ratified.

Article 2

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic and shall enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic.

This Decree shall be published in the Official Bulietin of the State.

Mogadishu, 5/4/1981.

Major/Gen. Mohamed Siad Barre

President of the
Somali Democratic Republic

SHARCI L. 28 ee 25 Abriile 1981.

U rogid Sharci rasmi ah Xeer Sharci lamb. 1 ee 31 Maarso 1981 kuna saabsan baabi'inta Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO TIXGELIYEYNA Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Waxaa loo rogay Sharci Rasmi ah xeer Sharci Lamb. 1 ee 31 Maarso 1981 kuna saabsan baabi'inta Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha.

Qod. 2

*(Dhaqan gal)*

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 25 Abriile 1981.

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 29 ee 25 Abriile 1981.

U rogid Sharci rasmi ah Xeer Sharci lamb. 2 ee 31 Maarso 1981, kuna saabsan baabi'inta Wakaaladda Ganacsiga Dharka iyo Maacuunta.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO TIXGELIYEYNA Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Waxaa loo rogay Sharci Rasmi ah Xeer Sharci lamb. 2 ee 31 Maarso 1981 oo ku saabsan baabi'inta Wakaaladda Ganacsiga Dharka iyo Maacuunta.

Qod. 2

*(Dhaqan gal)*

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 25 Abriile 1981.

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 30 ee 25 Abriile 1981.

U rogid Sharci rasmi ah Xeer sharci lamb. 3 ee 31 Maarso 1981, kuna saabsan baabi'inta Wakaaladda Horumarinta Xoolaha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO TIXGELIYEYNA Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Waxaa loo rogay Sharci Rasmi ah Xeer lamb. 3 ee 31 Maarso 1981 oo ku saabsan baabi'inta Wakaaladda Horumarinta Xoolaha.

Qod. 2

*(Dhaqan gal)*

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 25 Abriile 1981.

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 31 ee 28 Abriile 1981.

Dib ugu soo celin Dawladda Dhexe maamulka canshuurta faa'idada daaraha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Maamulka canshuurta faa'idada daaraha, oo hore loogu wareejiyey Sharciga lambarkiisu yahay 12 ee 14/10/1973 Dawladda Hoose, waxaa dib loogu celiyey Dawladda Dhexe (Wasaaradda Maaliyadda).

Qod. 2aad

Canshuurtii la hubiyey, lana bixin ka hor dhaqangalka Sharcigan, waxaa uruurineysa Wasaaradda Maaliyadda, iyadoo ku wareejin doonta Dawladda Hoose ee degaan xaq u leh.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Abriile 1981, wuxuuna ku soo bixi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 28 Abriile 1981.

MADAXWEYNAHA JDS

S./Gaas Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 32 ee 28 Abriile 1981.

Sharciga hawsha Difaaca Qaranka.
ISAGOO ARKAY Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya;

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELIYEYNA Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

*(Waajibnimada iyo Muddada)*

Ka qayb galka Hawsha Difaaca Qaranka waa waajib muqadas ah oo saaran muwaadin kasta.

Hawsha Difaaca Qaranka waxay ku waajibaysaa muwaadinka ay da'diisu u dhexayso 18 sano illaa 40 sano, jirkiisa io caafimaadkiisuna ay dhan yihiin.

Muddada qof kasta ku waajib ah inuu guto Hawsha Difaaca Qaranku waa 2 sano oo xirir ah.

Qod. 2

*(Baaris Caafimaad)*

Muwaadiniinta loogu yeeray Hawsha Difaaca Qaranka waxay marka hore marayaa nbaaris caafimaad, si loo hubiyo in ay leeyihiin shuruudaha ku xusan xubinta 2aad ee Qodobka 1aad ee Sharcigan.

Qod. 3

*(Aqoonsiga)*

1. Warqadda aqoonsiga gudashada Hawsha Difaaca Qaranka waxay ka mid tahay shuruudaha ugu muhiimsan ee shaqo qoridda ama gelitanka Jaamacadda, Dugsiyada iyo Macaahidda Sare ee Waxbarashada.

2. Muwaadinka ay ku Waajibtay Hawsha Difaaca Qaranka, hase yeeshee aan gudan, isagoo aan haysan cudurdaar sharci ah, waxaa ka reeban inuu u tartamo shaqada Qaranka, ama uu ka faa'iideysto deeqaha waxbarashada gudaha iyo dibedda intaba.

Qod. 4

*(Shuruudaha)*

Muwaadininta buuxisa shuruudaha Hawsha Difaaca Qaranka, waxaa loo kala qaybinayaa Ciidamada Qalabka Sida.

Qod. 5

*(Habeynta)*

Wasiirka Gaashaandhigga wuxuu abaabulaa, qorsheeyaa, iskuna duwaa habeynt aHawsha Difaaca Qaranka, wuxuuna awood u leeyahay magacaabidda Guddiyada fulinaysa xilkaas.

Qod. 6

*(Hay'adaha)*

Hay'adaha u xilsaaran Hawsha Difaaca Qaranka waxay toos u hoos yimaadaan Wasiirka Gaashaandhigga.

Qod. 7

*(Waajibaadka Dawladaha Hoose)*

Maamulka Dawladaha Hoose ee Gobollada iyo Degmooyinka waxaa ku waajib ah in ay u soo gudbiyaan Wasaaradda Gaashaandhigga 1da Jannaayo ee sannad kasta magacyad amuwaadiniinta gaaray 17 jir.

Sidoo kale, Maamulka Dawladaha Hoose waa inay soo gudbiyaan isbeddel kasta oo k uyimaadda xaaladda muwaadiniinta ku xusan xubitna hore ee qodobkan.

Qod. 8

*(Habka u yeeridda)*

Muwaadiniinta ay ku waajibtay Hawsha Difaaca Qaranka, sannadka ay u buuxsantay 18 jir, waxaa magacadooda lagu soo bandhigaa Xafiisyada Dawladaha Hoose ee ay ka diiwaansan yihiin.

Qod. 9

*(Dib u dhigidda)*

Wasiirka Gaashaandhigga wuxuu awood u leeyahay in:

1. Muwaadin kasta oo sabab sharciga waafaqsan ka reebaysa ka qayb galka Hawsha Difaaca Qaranka, uu dib ugu dhigo illaa inta ay ka dhammaanayso xaaladdaa iyada ah.

2. Xilliga nabadda, laba walaalo ah ay ku wada waajibtay in ay isku mar ka qayb galaan Hawsha Difaaca Qaranka, uu midkood dib ugu dhigo illaa inta midka kale uu ka soo dhammaysanaayo.

3. Xilliga nabadda, ardada loogu yeero Hawsha Difaaca Qaranka, iyagoo ku jira Dugsiyada Sare, Macaahidda Farsamada io Jaamacadda, uu dib ugu dhigo illaa ay ka dhammaysanayaan waxbarashada heerka ay markaas dhigtaan.

Qod. 10

*(Xannaano Dhaqaale)*

Muwaadiniinta loo qaato Hawsha Difaaca Qaranka waxay xaq u leeyihiin dhaqaale la mid ah kuwa la derejada ah ee ka tirsan Ciidamada Qalabka Sida.

Qod. 11

*(Ka Dhaafid)*

Wasiirka Gaashaandhigga wuxuu awood u leeyahay inuu ka dhaafo ka qayb galka Hawsha Difaaca Qa-

ranka, muwaadinka ku sifooba xaaladaha soo socda midkood:

a) Madiga oo labadiisa waalid ayan lahayn carruur kale;
b) Agoonta ay labadiisa waalid dhinteen, koriyana carruur la dhalatay.

Qod. 12

*(Ka sii deyn)*

Wasiirka Gaashaandhigga wuxuu awood u leeyahay inuu ka sii daayo Hawsha Difaaca Qaranka, iyadoo aa nmuddadeeda dhammaan, muwaadinka ku sifooba mid ka mid ah xaaladaha ku Qod. 11aad ee Sharcigan.

Qod. 13

*(Ciqaab)*

Muwaadinka loogu yeeray Hawsha Difaaca Qaranka ee ka dhuunta waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano illaa 6 sano oo xarig ah.

Qof kasta oo loo xilsaara yqoritaanka liiska wicitaanka Hawsha Difaaca Qaranka oo ogaal ahaan qof uga taga ama qof ku jira ka tirtira liiska, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano illaa 10 sano oo xarig ah.

Qod. 14

*(Awoodda qaadidda dembiyada)*

Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida ayaa awood u leh qaadidda dembiyada ku xusan Sharcigan.

Qod. 15

*(Dhaqan gal)*

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa 15 maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaliya.

Muqdisho 28 Abr. 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 33 ee 28 Abriile 1981.

Sharciga Abaalmarinta C.Q.S.

ISAGOO ARKAY Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO TIXGELIYEYNA Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

*(Billadaha Maamuuska)*

Waxaa la dhisay Habka Billadaha Maamuuska Ciidamada oo lagu abaalmariyo falalka gaar ahaaneed ee Geesinnimada Ciidamada, si loo muujiyo in falalku mudan yihiin xushmad guud, isla markaasna u noqda tusaale dhiirri-gelinta dhammaan xubnaha Ciidamada.

Qod. 2

*(Qaybaha Billadaha)*

Abaalmarinta Maamuuska Ciidamada waxay yihiin:

1. Xiddigta Geesinnimada Soomaaliyeed;
2. Billadda Dahabka;
3. Billadda Qallinka;
4. Billadda Maarta;
5. Billadda ka qayb galka dagaalka;
6. Billadda ka qayb galka taakuleynta;
7. Billadda Xiriirka Shaqada Dheer.

Qod. 3

*(Shuruudaha Abaalmarinta)*

1. Billadaha Maamuuska Ciidamada waxaa la guddoonsiinayaa dadka ku kaca fal geesinnimo leh oo sameyntiisu haddii la dhaafo aan waxba u dhimeynin

Sharciga iyo waajibka, kana hortaga khatar weyn ee u muuqata halisna gelin karta naftooda xilli dagaal.

2. Maamuuska Billadaha waxaa la bixin karaa oo keli ah marka falka la sameeyey yahay dhan kastoo laga eego mid lagu dayan karo.

Qod. 4

*(Maamuuska Xilliga Nabadda)*

Xiddigta Geesinnimada Soomaaliyeed, Billadda Dahabka, Qalinka iyo Maarta ee Ciidamada waxaa la guddoonsiin karaa, xilli nabadeed, markii ay jiraan xaaladaha ku xusan qodobka 3aad ee Sharcigan.

Qod. 5

*(Abaalmarinta Xilliga Nabadda)*

1. Xilliga nabadda sifooyinka falka geesinnimo waa in ay noqdaan kuwa la xiriira waajibaadka loo dhisay Ciidamada, iyadoon loo eegin sifada qofka falka sameeyey.

2. Haddii falka geesinnimo uu yahay mid la xiriira xirfaddiisa ama mid naxariisi ka keentay, kana baxsan hawlaha loo dhisay Ciidamada, waxaa la siinayaa abaalgu dnooc kale ah, inkastoo qofku uu ka mid yahay Ciidamada.

Qod. 6

*(Qiimeynta Falka)*

Derajada Maamuuska Billadaha Ciidamada waxaa lagu qiimeeyaa habka inta nn le'eg yahay falka qofku uu sameeyey oo muujinaaya waxyaabaha uu ka kooban yahay niyadda sare, khatarta uu ka hortagay iyo guud ahaan natiijad ka soo baxday.

Qod. 7

*(Awoodda bixinta Billadaha)*

1. Bixitna Billadaha Maamuuska Ciidamada waxaa guddoomiya Madaxweynaha J.D.S., waxaana lagu

soo saaraa xeer Madaxweyne, isagoo dhegeystay soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga.

2. Madaxweynhu, xilliga dagaalka, wuxuu awood u leeyahay in uu u wakiisho bixinta Billadaha Madaxda Sare ee Ciidamada, asagoo kaddib ku soo saaraya xeer.

Qod. 8

*(Soo jeedinta Abaalmarinta)*

1. Soo jeedinta abaalmarinta xubnaha Ciidamada waxay ka iman kartaa taliyaha tooska u xukuma ama taliye isaga ka sarreeya.

2. Soo jeedinta, ayadoo ay ku lifaaqan yihiin warbixinnada loo baahan yahay ee caddeynaaya falka uu qofku sameeyey iyo waxyaabaha qiimaha leh ee ku jira, taariikhda iyo meesha uu ku sameeyey, waxay soo maraysaa habka kala saraynta si madaxdu ay uga dhiibtaan ra'yigooda.

3. Warbixinnada waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda Gaashaandhigga, muddo ku siman 3dex bilood gudahooda, laga bilaabo marka uu falku dhacay.

Qod. 9

*(Guddiga Abaalmarinta)*

1. Soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga uu u bandhigayo Madaxweynaha waxaa saldhig u ah ra'yiga Guddi loo magacaabay arrintaas, wuxuuna fikrad ka dhiibanayaa mudnaanta bixinta iyo derajada Abaalmarinta Billadda Maamuuska.

2. Guddiga Abaalmarinta Ciidamada wuxuu ka kooban yahay:

a) Abbaanduulaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed;

b) Afar Sarkaal Sare ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed;

t ) Laba Sarkaal Sare ee ka tirsan Ciidanka qofka la abaalmarinayo.

3. Habka Shirarka iyo hawlgalka Guddiga waxaa saldhig u noqonaya wareegtada Wasiirka Gaashaandhigga.

Qod. 10

*(Abaalmarinta Ciidamada ka fariistay shaqada)*

1. Xubnaha Ciidamada shaqada ka fariistay ama dadka sameeyey fal qiimo militeri leh waxaa soo jeedinaya abaalmarintooda Madaxda Ciidamada ee meesha falku ka dhacay.

2. Waqtiga iyo habka soo jeedintaas waxaa la raacayaa sida ku xusan qodobka 8aad ee Sharcigan.

Qod. 11

*(Go'aanka Guddiga)*

Soo jeedinta aan la oggolayn lagama dacwoon karo, sida oo kale waxaan laga dacwoon karin qiimeynta la sameeyey si loogu helo isla falka abaalmarin ka sarreeysa midda horey loo guddoonsiiyey.

Qod. 12

*(Maamuusidda muteystaha geeriyooday)*

1. Haddii qof sameeye yfal qiimo Ciidan uu geeriyoodo, Billadda Maamuusidda waxaa loo bixin karaa xusuus ahaan.

2. Billadaha iyo Shahoodooyinka maamuusidda Ciidamada loo bixiyey xusuusta qofka dhintay waxaa la guddoonsiinayaa Ilmihiisa kan ugu weyn, afadiisa ama waalidiintiisa midkood.

3. Markii la waayo Ehelada la soo sheegay, Billadaha iyo Shahaadooyinka maamuusidda waxaa la guddoonsiinayaa Colkii uu qofku ka tirsanaa.

4. Haddii uu geeriyoodo qofka la guddoonsiiyey Billadaha iyo Shahaadooyinka maamuusidda ee loo bixiyey xusuus ahaan, isu gudbitna lahaanshaha Billadaha iyo Shahaadooyinka maamuusidda waxaa lagu dhaqayaa qawaaniinta dhaxalka u degsan, isla qawaaniinta iyada ah waxaa lagu dhaqayaa xataa haddii uu dhinto qofka horay u haystay Billadaha iyo Shahaadooyinka maamuusidda.

Qod. 13

*(Maamuusidda Falalka badan ee Ciidan)*

Falka qiimaha Ciidan leh ee dhowr jeer dhaca, haddii aan lagu maamuusin abaalgud kale, waxaa midkiiba la guddoonsiin karaa Billad Maamuus, iyadoo aan tiradeeda la xaddidin.

Qod. 14

*(Xiddigta Geesinnimada)*

Xiddigta Geesinnimada Soomaaliyeed waxaa muteysta qofka sameeyey fal qiimo weyn u leh Qaranka ama ka hortaga fal wax u dhimi kara jiritaanka Qaranka.

Qod. 15

*(Astaanta Xiddigta Geesinnimada)*

1. Xiddigta Geesinnimada Soomaaliyeed waa Dahab, waxayna leedahay dhexroor cabbirkiisu yahay 35 mm. dhinaca wax aakaga xardhan xiddig ay dhexda ugu qoran tahay oraahda ah «GE)SI» iyo taairikhda la muteystay,, dhinaca kale waxaa uga xardhan astaanta Qaranka.

2. Billadda Geesinnimada waxay wadtaa xasaw midabkeedu yahay Buluugga Calanka, waxayna dhex-d aku leedahay jiitin cad.

Qod. 16

*(Astaanta Billadda Dahabka)*

1. Billadda Dahabku, waxay leedahay dhexroor cabbirkiisu yahay 35 mm· dhinaca waxaa kaga xardhan laba xirmo oo Caw Baar ah oo ay kaga qoran tahay dhexda taariikhda la muteystay, dhinaca kale waxaa kaga qoran astaanta Qaranka.
2. Billadda waxay leedahay xasaw midabkeedu yahay Buluug oo geesaha ku leh laba jiitin oo cas.

Qod. 17

*(Astaanta Billadda Qalinka)*

1. Billadda Qalinka, waxay leedahay dhexroor cabbirkiisu yahay 35 mm. dhinaca kale waxaa kaga xardhan laba xirmo oo Caw Baar ah oo ay kaga qoran tahay dhexda taariikhda la muteystay, dhinaca kale waxaa kaga qoran astaanta Qaranka.
2. Billaddu waxay leedahay xasaw midabkeedu yahay cagaar geesaha ku leh laba jiitin oo casaan ah.

Qod. 18

*(Astaanta Billadda Maarta)*

1. Billadda Maarta, waxay leedahay dhexroor cabbirkiisu yahay 35 mm. dhinaca waxaa kaga xardhan laba xirmo oo Caw Baar ah oo ay kaga qoran tahay dhexda taariidhka la muteystay, dhinaca kale waxaa kaga qoran astaanta Qaranka.
2. Billaddu waxay leedahay xasaw midabkeedu yahay guduud oo geesaha ku leh laba jiitimood oo ca gaaran.

Qod. 19

*(Billadda ka qayb galka dagaalka)*

Waxaa muteysta qofkii ka tirsan Ciidanka oo si toos ah ugu qayb galay dagaalka·

Qod. 20

*(Astaanta Billadda ka qayb galka dagaalka)*

1. Billadda ka qayb galka dagaalka waa Maar, waxayna leedahay dhexroor cabbirkiisu yahay 35 mm. waxaa dhinaca kaga xardhan laba caleemood oo yaryar ah oo ay ku dhex qoran yihiin taariikhda bilowga-dhammaadka dagaalka, dhinaca kale waxaa kaga xardhan astaanta Qaranka.

2. Billaddu waxay leedahay xasaw midabkeedu yahay casaan oo geesaha ku leh laba jiitin oo Buluug ah.

Qod. 21

*(Astaanta Billadda ka qayb galka taakuleynta)*

1. Billadda ka qayb galka taakuleynta waa Maar, waxayna leedahay dhexroore cabbirkiisu yahay 35 mm. waxaa dhinaca kaga xardhan laba caleemood oo yar yar iyo waqtig ataakuleynta, dhinaca kale waxaa kaga xardhan Astaanta Qaranka.

2. Billadda ka qayb galka Taakuleynta waxay leedahay xasaw midabkeedu yahay casaan geesaha ku leh laba jiitin oo ah «Buluug iyo guduud».

Qod. 22

*(Xasawda Billadaha)*

Marka aan Billadda la qaadanayn waxaa Libiska Militeriga lagu qaataa dhinaca bidixda ee xabadka xasawda yar oo cabbirkeedu yahay 37 mm. × 10 mm. waxayna dhexda ku wadat aaxiddig yar oo dahab ah kuwa leh Billad Geesi, Dahab, Xiddig yar oo qalin ah, kuwa leh Billadda Qalinka, Xiddig yar oo Maar ah, kuwa leh Billadaha Maarta, ka qayb gal dagaal iyo Billadda shaqada waqtiga dheer.

Qod. 23

*(Billadda Xiriirka Shaqada Dheer)*

Billadda Shaqada waxaa muteysta qofkii ka tirsan Ciidamada oo muddo 10 sano xiriir ah muujiya anshax iyo asluub wanaag, waxaana muddadaas ka dib 5tii sano baa la guddoonsiin karaa Billad Shaqo.

Qod. 24

*Astaanta Billadda Xiriirka Shaqada Dheer)*

1. Billadda Shaqadu waa Maar, waxayna leedahay dhexroor cabbirkiisu yahay 35 mm. waxaa dhinac uga qoran laba caleemood oo yar yar iyo inta sano oo shaqada la hayey, dhinaca kale waxaa ku xardhan Astaanta Qaranka.

2. Billadda Shaqada waxay leedahay xasaw midabkeedu yahay casaan oo geesaha ku leh laba jiitin oo buluug-madow ah.

Qod. 25

*(Xasawda Dhaawaca)*

Xasawda Dhaawaca waxaa xaq u leh qofkii ku dhaawacma dagaal.

Qod. 26

*(Astaanta Xasawda Dhaawaca)*

Xasawda Dhaawaca waa xasaw dahab ah, ballaceedu yahay 5 mm. dhererkeeduna yahay 5 sm.

QODOB 27

*(Xushmadda Muteystayaasha)*

1. Siteyaasha Abaalmarinta Xiddigta Geesinnimada Soomaaliyeed, Billadaha Dahabka, Qalinka iyo Maarta, waxay salaan xaq ah oo Militeri ugu leeyihiin Askariga Ilaaliyaha ah.

2. Muteystayaasha Billadaha Ciidanka waxay salaan xaq ah ugu leeyihiin kuwa la derejada ah oo ay isku xil hayaan ama ay isku muddo xiriir shaqo yihiin.

Qod. 28

*(Abaalmarinta Colka)*

1. Billadaha Maamuuska Ciidamada, waxaa la guddoonsiin karaa oo kale: Horin - madax bannaan, Dhismo Ciidan, Urur iyo wixii k asarreeya ee si wadajir ah u soo hooyey xilli dagaal guul qiimo ciidan leh.

2. Billadduhu waxay ka lushaan Calanka ama Calaamadda Colku leeyahay.

Qod. 29

*(Xuquuqda Dhaqaale)*

Billad kasta ee Maamuus Ciidan waxaa la guddoonsiinayaa Sanadkiiba lacagta Billad kasta ku hor qoran:

a) Xiddigta Geesinnimada Soomaaliyeed . . . . . . . Sh. So. 3.000.
b) Billadda Dahabka ah . . . Sh. So· 1.800
t) Billadda Qalinka ah . . . . Sh. So, 1.200
j) Billadda Maarta ah . . . . Sh. So. 360

Qod. 30

*(Waxyaabaha ka reeban xuquuqda dhaqaale)*

Lacagta ku qoran Qod. 30aad waxaa la siiyaa Muteystaha, lagamana ceshan karo, isaguna cid kale kuma wareejin karo.

Qod. 31

*(Xushmada Billadda Geesiga)*

1. Qofkii isagoo nool muteysta laba iyo in ka badan Xiddigta Geesinnimada Soomaaliyeed waxaa Taallo looga dhisi karaa Magaalo Madaxda.

2. Qofkii isagoo horey u muteystay hal mar xiddigta Gxsinnimada Soomaaliyeed dhinta, waxaa Taallo looga dhisi karaa Magaalo Madaxda Gobolka uu ku dhashay.

3. Muteystayaasha Xiddigta Geesinnimada Soomaaliyeed waxaa lagu magacaabi karaa Magaalo, Iskuul, Waddo, Xero Militeri, iwm.

4. Qofkii Muteysta Saddex Billadood Dahab waxaa Taallo loogu dhisi karaa Magaalo Madaxda.

Qod. 32

*(Waqtiga bixinta Billadaha)*

Billadaha maamuuska Ciidamada waxaa lagu guddoonsiiyaa Xaflad weyn maalmaha Ciidaha Qaranka, ayadoo Colku kulansan yahay. Billadaha waxaa lala baxshaa Shahaado uu saxiixay Madaxweynaha, ayadoo ku qoran sababta loo siiyey oo kooban.

Qod. 33

*(Xaaladaha lagu lumiyo Billadaha)*

Muteystaha waxaa laga qaadayaa Billadaha Abaalmarinta, marka uu ku kaco fal lid ku ah jiritaanka Qarannimada oo Maxkamadi sugtay. Kala noqoshada abaalmarinta waxaa lagu soo saaraa Xeer Madaxweyne.

Qod. 34

*(Xushmadda Billadda Dahabka)*

Muteystayaasha Billadaha Dahabka ah, marka ay geeriyoodaan, waxaa lagu magacaabi karaa: Dugsi, Waddo, Xero militeri, iwm.

Qod. 35

*(Xuquuqda gaar ahaaneed)*

1. Muteystayaasha Billadhaa Dahabka, Qalinka iyo Maarta ee Ciidamada Qalabka Sida, waxay yeelanayaan xuquuqda abaalmarinta u dhiganta ee ku xusan Qod. 12aad ee Sharciga tir. 65 ee 19ka Oktoobar 1970.
2. Muteystayaasha Xiddigta Geesiga, waxay leeyihiin xuquuqda Billadda Dahabka ah.

Qod. 36

*(Dadka xaqa u leh xasawda dhaawaca)*

Waxaa qaadashada xasawda dhaawaca xaq u leh xubnaha Ciidamada Qalabka Sida iyo qof kasta oo dagaal dhaawac ku gaaro kuna muteystay xuquuq dhaqaale.

Qod. 37

*(Habka qaadashada xasawda)*

Xasawda waxaa lagu qaataa gacanta bidixda ah, ayadoo janjeerta.

Qod. 38

*(Xuquuqda lagu muteysto xasawda)*

Muteystayaasha xasawda dhaawaca aad u culus waxay xaq u leeyihiin tashiilaadka ay leeyihiin muteystayaasha Billadda Dahabka ah ee Ciidamada.

Qod. 39

*(Oggolaansho qaadasho*

Qaadashada Xasawda Dhaawaca, waxaa oggolaada Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga isagoo tixgeliyey soo jeedimaha Taliyayaasha Colalka.

Qod. 40

*(Xuquuqda dhaqaale ee Xiddigta Soomaaliyeed)*

Xubnaha ka tirsan Ciidamada Qalabka Sida oo horay loo guddoonsiiyey Xiddigta Soomaaliyeed, waxay leeyihiin xuquuqdoodii dhaqaale ee hore.

Qod. 41

*(Billadda ka hortagga dhibaatooyinka Qaranka)*

Qofkii Ciidamada ka tirsan ee xilli nabadeed sameeya fal uu ku sugayo jiritaanka Qaranka xasilloonida iyo nabadgelyada gudaha, wuxuu muteysanayaa abaalmarin ka mid ah kuwa ku xusan xubnaha 1, 2, 3 iyo 4 ee Qod. 2aad ee Sharcigan.

Qod. 42

Waxaa la buriyey Sharci ama Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 44

*(Dhaqan gal)*

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 12 Abriil 1981, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 28 Abriile 1981.

MADAXWEYNAHA JDS

SHARCI L. 34 ee 28 Abriile 1981.
Sharciga Dallacaadda Saraakiisha.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY Qodobka 72aad xubitna 1aad ee Dastuurka;

ISAGOO TIXGELIYEYNA Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

1. Sarkaalku wuxuu dallici karaa markuu daacadnimo, Asluub wanaag, garaad aqooneed iyo xirfadeed ku sifoobo mid u qalma kartina u leh inuu guto waajibka iyo xilka la xiriira derajada uu u dallacaayo.

2. U dallacaadda derajada Sarreeyaha waxaa ahmiyad gaar la siinayaa sifooyinka ku xusan xubinta hore ka sokow, kartida abaabulka iyo hoggaamitna Ciidamada ama aqoonta sare eeSarkaalka u leeyahay takhasuska u gaarka ah.

Qod. 2

*(Siyaabaha dallacaadda lagu muteysto)*

b) U bislaansho waqti;
t) U garasho;
j) Mudnaan.

Qod. 3

*(Dallacaadda u bislaansho waqti)*

Sarkaalku wuxuu muteysan karaa dallacaad waqti markii isagoo loo aqoonsaday inuu ku sifoobay shuruudaha ku xusan Qod. 1, ay u buuxsamaan waqtiga ku xusan Qod. 6 ee Sharcigan.

Qod. 4

*(Dallacaadda u garasho)*

Sarkaalku wuxuu muteysan karaa dallacaad ah u garasho markii, isagoo la yimid shuruudaha ku xusan Qod. 1, uu ka mid yahay Saraakiisha loo aqoonsaday dallacaad u garasho iyo kala horreeynta Diiwaanka, inay buuxiyaan Orgaanikada.

Qod. 5

*(Dallacaadda mudnaanta)*

Sarkaalku wuxuu mudnaan ugu dallici karaa markii isagoo ku sifoobay shuruudaha ku xusan Qod. 1, uu fuliyo hawl qiimo weyn u leh Ciidamada ama dalka, muujiyana awood sare oo uu ku hoggaamiyo hawlaha la xiriira xilka iyo derajada loo dallacsiinaayo.

Qod. 6

*(Muddada dallacaadda)*

Muddada u bislaanshaha dallacaadda min derajo illaa derajo waatan soo socota:

| | |
|---|---|
| Xiddigle illaa L/Xiddigle | 2 sano |
| L/Xiddigle illaa Dhamme | 3 sano |
| Dhamme illaa Gaashaanle | 4 sano |
| Gaashaanle illaa G/le Dhexe | 4 sano |
| G/le Dhexe illaa G/le Sare | 4 sano |
| G/le Sare illaa S/Guuto | mudnaan, Orgaaniko |
| S/Guuto illaa S/Gaas | mudnaan, Orgaaniko |
| S/Gaas illaa S/Guud | mudnaan, Orgaaniko |

Qod. 7

*(Diiwaanka kala horaynta)*

Derajada iyo Nidaamka kala horaynta Saraakiisha wuxuu ku qeexan yahay Diiwaanka Saraakiisha, waxaana loo kala horaysiinayaa sidii ay ugu kala horreeyeen imtixaankii hore ama qiimeyntii imtixaankii dallacaaddii ugu dambeysay.

Qod. 8

*(Diiwaanka Saraakiisha)*

Saraakiisha waxaa lagu qoraa Diiwaanka guud iyo kan gaar ahaaneed, ayagoo loo kala saarayo takhasuskooda.

Qod. 9

*(Kala horaynta Saraakiisha X. D. Soomaaliyeed)*

Saraakiisha Xoogga dalka Soomaaliyeed waxay u kala horreeyaan:

1. CIIDANKA DHULKA

1. Saraakiisha Ciidanka Lugta (Danab, Sahan-Baarashuud)
2. Saraakiisha Colalka Taangiyada iyo G.G.
3. Saraakiisha Madaafiicda Goobta
4. Saraakiisha Sancada
5. Saraakiisha War-Isgaarsiinta
6. Saraakiisha Gaadiidka
7. Saraakiisha Saadka
8. Saraakiisha Maamulka Lacagta
9. Saraakiisha Caafimaadka
10. Saraakiisha Injiyeeriyada iyo aqoonyahannada Sharciga
11. Saraakiisha Farsamayaqaannada Teknikada kala duwan
12. Saraakiisha Kiimikada.

2. CIIDANKA CIRKA

1. Duuliye (Dagaal-Gaadiid)
2. Hoggaamiye
3. Injiyeerrada Mekaanik, Isgaarsiin
4. Farsamayaqaan
5. Saadka iyo Maamulka Lacagta.

## 3. CIIDANKA BADDA

1. Badmaridda - Malaaxiinta
2. Gantaal - Madfac
3. Miino - Torbeed
4. War-Isgaarsiin
5. Elektro Mekaanik
6. Raadaar
7. Kiimiko
8. Caafimaad
9. Ciidamo gaar ahaaneed ee Badda:
   a) Dilaaxiinta Badda
   b) Quusayaasha Badda.

## 4. CIIDANKA DIFAACA CIRKA

1. Gantaal - Madfac
2. Raadaar
3. War-Isgaarsiin
4. Farsamayaqaanno
5. Saadka
6. Maamulka Lacagta.

### Qod. 10

*(Sarreeyayaasha)*

Saraakiisha Sarreeyayaasha waxay ku wada qoran yihiin hal Diiwaan iyagoo loo eegayo kala horaynta, mid walibana waxaa ku hor qoran takhasuskiisa.

### Qod. 11

*(Guddiga qiimeynta Saraakiisha)*

Guddiga Qiimeynta waxay ka kooban yihiin:

1) Guddiga Sare;
2) Guddiga noocyada Ciidamada, Qaybaha, De-

gaanka Xamar, Saldhigyada madax bannaan iyo Hay'-adaha Waxbarasho.

Qod. 12

*(Guddiga Sare ee Qiimeynta Saraakiisha)*

Guddiga Sare ee Qiimeynta Saraakiisha wuxuu ka kooban yahay:

1) Hal Wasiir-ku-xigeen Guddoomiye
2) Shan Madax Hoggaan oo derajadoodu aysan ka yarayn G/Sare

Qod. 13

*(Guddiga Qiimeynta Saraakiisha Noocyada Ciidamada)*

Guddiga qiimeynta noocyada Ciidamada Qaybaha wuxuu ka kooban yahay:

1) Taliyaha Ciidanka;
2) Abbaanduulaha;
3) Saddex Sarkaal oo derajadoodu aysan ka yarayn G/le Dhexe.

Qod. 14

*(Guddiga Qiimeynta Saraakiisha ee Qaybaha)*

Quddiga qiimeynta dallacaadda Saraakiisha ee Qaybaha wuxuu ka kooban yahay:

1) Taliyaha Qaybta
2) Abbaanduulaha Qaybta
3) Taliyayaasha Gaasaska.

Qod. 15

*(Guddiga Qiimeynta Dallacaadda Saraakiisha Degaanka Xamar, Saldhigyada Madax Bannaan iyo Hay'adaha Waxbarashada, Kulliyadaha)*

Wuxuu ka kooban yahay:

1) Taliyaha
2) Abbaanduulaha

3) Taliyayaasha Colalka ka tirsan Deegaanka, Saldhigga iyo Waaxyaha Waxbarashada, Kulliyadaha iyo wixii u dhigma.

Qod. 16

*(Awoodda Guddiyada)*

1) Guddiga Sare wuxuu awood u leeyahay dib u eegidda soo Jeedin qiimeynta Saraakiisha noocyada Ciidamada, Qaybaha iyo go'aaminta arrin kasta ee ku saabsan dallacaad ee Wasiirka Gaashaandhigga u xilsaaro.

2) Guddiyada Qiimeynta Saraakiisha noocyada Ciidamada iyo Qaybaha waxay awood u leeyihiin qiimeynta Saraakiisha darajadoodu tahay illaa G/le Dhexe ee ku dallacaysa u bislaansho waqti. Waxaa kale oo ay qiimeyn karaan dallacaad ku timaada u garasho iyo mudnaan markii loo xilsaaro.

3) Madaxda sida tooska u xukunta Saraakiisha la qiimeynayo, waxay qiimeyntoodu khuseyn kartaa dallacaadda ku timaadda- u bislaansho waqti.

Qod. 17

*(Habka Qiimeynta Guddiyada)*

1) Xubnaha Guddiyada Qiimeynta waxay si caddaan ah u bixinayaan codkooda, ayadoo xubnuhu cod bixinta ugu kala horreenayaan sida ay u kala derajo yar yihiin.

2) Shirka Guddiga Qiimeynta, wuxuu ku ansaxayaa markii ay kulanka ka soo qayb qaataan saddex dalool laba (2/3) ugu yaraan xubnaha Guddiga, go'aankuna wux uuku ansaxayaa cod hal dheeri ah.

Qod. 18

*(Awoodda Wasiirka Gaashandhigga)*

Wasiirka Gaashaandhiggu wuxuu awood u leeyahay magacaabidda, isugu yeeridda, ansixinta, ama wax ka beddelidda go'aannada ku xusan qod. 11.

Qod. 19

*(Saraakiisha aan Dallacaada loo Qiimeyn karin)*

Looma qiimeyn karo dallacaad Sarkaalka loo haysto fal ah dembi ciqaabeed, laga joojiyey shaqada, laga qaaday derajada ama ku jira fasax lacag la'aaneed.

Qod. 20

*(Ka Joojin Dallacaadda)*

1) Sarkaal waxaa dallacaadda laga joojin karaa markii uu ku sifoobo xaalad ka mid ah kuwa ku xusan Qod. 19 ee Sharcigan.

2) Ka joojinta dallacaada waxay baabi'ineysaa ra'yiga Guddiga Qiimeynta.

Qod. 21

*(Shardiga Aasaasiga u ah Dallacaadda)*

Sarkaalka derajadiisu ka sarreeyso Laba Xiddigle ee aan soo hoggaamin Ciidan u dhigma derajadiisa ama hawl la xiriirta takhasuskiisa, looma qiimeyn karo dallacaad.

Qod. 22

*(Derajooyinka ku xiran Imtixaan)*

Derajooyinka Laba Xiddigle illaa G/le Sare waxay ku xiran yihiin Imtixaan. Waxaa imtixaan laga qaadayaa Sarkaalka Guddiyadu u gartaan inuu mudan yahay Dallacaad.

Qod. 23

*(Qiimeynta Sarkaalka)*

1. Guddiyada Dallacaaddu waxay go'aankoodu qiimeynta Sarkaalka ku sifeyn karaan:

a) Aad u wanaagsan

t) Ma xuma

b) Wanaagsan

j ) Lagama raalli noqon karo.

2. Sarkaalka lama dallacsiin karo haddii laba derajo dhexdood lagu qiimeeyo ma xuma iyo lagama raalli noqon karo.

Qod. 24

*(Sababaha reebaya dallacaadda)*

Sababaha reebaya Dallacaadda:

b) Sarkaalka codsada inuusan ka qayb gelin imtixaannada lagu muteysanaayo dallacaadda.

t ) Sarkaalka aan gudbin imtixaanka.

Qod. 25

*(Waxbarashada dibedda ama hawl)*

Saraakiisha waxbarasho ama hawl awgeed dibedda ugu maqan ee aan ka qayb geli karin imtixaanka dallacaadda, waxaa qiimeynaya Wasiirka Gaashaandhigga.

Qod. 26

*(Saldhigga qiimeynta)*

1. Guddiyada Qiimeynta dallacaadda Saraakiisha waxay saldhig uga dhigayaan ra'yigooda qoraallada ku jira galalka Saraakiisha iyo Warbixinnada madaxdooda.

2. Guddiyadu waxay awood u leeyihiin inay u yeertaan madaxda hawsha weli haysa ee horey u maamuli jirtay Sarkaalka la qiimeynayo.

Qod. 27

*(Dallacaadda Dagaalka)*

Dallacaadda dagaalka waxaa la siin karaa Sarkaalka muujiya, waqtiga dagaalka, hoggaamin aad u sarreysa, soona hooya guul waxtar u leh hawl galka.

Qod. 28

*(Dhaqan gal)*

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 28 Abriile 1981.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI'L. 35 ee 30 Abriile 1981.

Mashruuca Warshadda Shamiintada Berbera.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

*(Dhismaha Mashruuca)*

1. Marka laga bilaabo 15.4.1981, waxaa la dhisay Mashruuca Warshadda Shamiintada Berbera oo hadda kaddib la oran doono: Mashruuca Dhismaha Berbera.

2. Mashruuca Shamiintadu waa hay'ad madax bannaan oo leh jiritaan iyo shakhsiyad sharciyeed.

3. Mashruuca waxaa lagu dhaqayaa Sharciyada Mashaariicda iyo Hay'adaha Dawladda ee madax banaann, wuxuuna u hoggaansami doonaa Sharcigan iyo Sharciyada kale oo Dalka.

4. Mashruuca Shamiintadu wuxuu yahay darajada «A».

Qod. 2aad

*(Kormeerka iyo awoodda Wasiirka)*

Washruucu wuxuu hoos imaanayaa Wasiirka Wasaaradda Warshadaha oo awood u leh inuu siiyo wixii talo ama awaamir ah ee la xiriira hirgelinta Mashruuca.

Qod. 3aad

*(Ujeeddada Mashruuca)*

Ujeeddada Mashruucu waxay tahay;

1. Inuu diyaarsho meelaha (Quarries) laga soo saarayo alaabooyinka ceeriin oo laga sameeyo sha-

miintada, ayadoo la raacayo Sharciga iyo xeerka Macdaneynta Dalka (Mining Code and Mining Regulation).

2. Inuu diyaarsho qalabka qoditaanka iyo gaadiidka ee lagu siinayo Warshadda alaabooyinka ceeriin ee shamiintada laga sameeyo iyo gaadiidka lagu daadgureeyo shamiintada ay Warshaddu soo saarto.

3. Inuu dhiso qaybaha Mashruuca oo ka kooban:

— Warshad shamiinto oo kaamil ah, lehna awood tacab soo saar oo dhan ugu yaraan 200.000 tan oo ah shamiintada loo yaqaan (Portland cement);

— Motoorro dhaliya quwad koronto oo daboosha baahida Warshadda iyo qaybaha kale ee Mashruuca;

— Diyaaritna dhuumaha biyo-gelinta Mashruuca (water system) iyo dhuumaha ama habka lagaga qaado wasakhda warshadda (sewage system);

— Hoosooyinka iyo maqaasinnada uu u baahan yahay Mashruucu;

— Guryaha iyo qalabka lagu farsameeyo, haddii loo baahdo, wixii haraa ah (by-products) ee ka soo baxa Warshadda shamiintada.

4. Inuu isku duwo una kontoroolo hawlaha kala duwan ee la xiriira injiyeernimada dhismaha, rakibaadda qalabka iyo tacab soo saarka Warshadda.

5. Inuu fuliyo wixii hawlo ah ee la xiriira dhaqan-gelinta ujeeddooyinka dhismaha Mashruuca Shamiintada.

6. Inuu diyaarsho qalab iyo maamul hagaagsan ee hay'adaha Warshadda Shamiintada;

7. Inuu soo xulo tababarana Farsamayaqaannadii wadi lahaa Warshadda marka ay dhammaato.

Qod. 4aad

*(Xarunta Mashruuca)*

Xarunta Mashruucu waxay noqoneysaa Berbera, hase yeeshee wuxuu laamo ka furan karaa meeshii kale oo loo baahdo si loo fuliyo ujeeddooyinka ku xusan Qod. 3aad ee Sharcigan.

Qod. 5aad

*(Qaabka Mashruuca)*

Mashruucu wuxuu yeelanayaa Mareeye Guud iyo Maareeyayaal Waax, waxaana lagu magacaabi doonaa Xeer uu soo saaro Madaxweynaha JDS.

Qod. 6aad

*(Awoodda Maareeyaha Guud)*

Maareeyaha Guud, isagoo ka wakiil ah Mashruuca, wuxuu leeyahay awoodda soo socota:

1. Waa Madaxa maamulka idman ee Mashruuca.

2. Wuxuu awood u leeyahay, marka uu helo oggolaanshaha Wasiirka, inuu heshiisyo la galo Shirkadaha ka qayb qaadanaaya hawlaha dhismaha iyo hirgelinta Mashruuca.

3. Wuxuu sugayaa in Mashruucu u hirgalo habkii loogu talo galay, xag farsamo (technical specification), xag bartilmaameedyo hantigelin iyo xag muddo dhismo intaba.

4. Wuxuu diyaarinayaa qorshe taxan oo lagu tababarayo Shaqaalaha maamulka, farsamada iyo tacab soo saarka ee Warshadda Shamiintada.

5. Wuxuu warbixin bileed oo la xiriirta hawlaha Mashruuca u gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.

Qod· 7aad

*(Hantida Mashruuca)*

Mashruucan hantidiisu waxay ka kooban tahay:

b) Qiimaha dhulka ay Dawladdu ku wareejisay Mashruucaas;

t ) Wixii uu Mashruucu ku isticmaalo deynta ay Soomaalidu qaadatay ee lagu hirgelinaayo Mashruuca;

j ) Wixii miisaaniyad ah ee ay Dawladdu sannadkii u goyso Maamulka hantigelinta Mashruuca.

x) Wixii dakhli ah ee ka soo gala hawlaha iyo hantida Mashruuca.

Qod. 8aad

*(Miisaaniyadda Mashruuca)*

Maareeyaha Guud waa inuu diyaariyaa sannad walba, waqti aan ka badnayn 30ka Sebtembar, caddeynta miisaaniyadda ee sannadka soo socda, oo muujinaaya ku talo galka wixii soo geli kara iyo kharajka Mashruuca.

Caddeynta miisaaniyadda ee sannadka waxaa loo gudbinayaa Wasaaradaha Warshadaha iyo Maaliyadda, si loo oggolaado.

Qod. 9aad

*(Xisaabaadka Sannadka)*

1. Xisaabaadka sannadka ee Mashruuca waxay billaabaneysaa 1da Jeennaayo, waxayna dhammaaneysaa 31ka Disember·

2. Maareeyaha Guud wuxuu 31ka Maarso ee sannad kasta diyaarinayaa xisaabaadka kama dambeysta ah iyo xisaabaadka kharaashka iyo faa'idada ee sannadkii hore, wuxuuna u gudbinayaa Wasaaradaha Warshadaha iyo Maaliyadda.

3. Xisaabaadka Mashruuca wax aaloo wadayaa sid aay tilmaamayaan Sharciyada iyo Xeerarka Dawladdu u dejisay maamulka xisaabaadka.

4. Xisaabaadka Mashruuca waxaa baaraya oo dhowraya Hay'adaha baarista ee Qaranka.

Qod. 10aad

*(Xeer-Nidaamiye)*

Madaxweynaha JDS wuxuu awood u leeyahay, ka dib markuu helo talo soo jeeditna Wasiirka Warshadaha, inuu soo saaro Xeer-Nidaamiye lagu faahfaahinayo Sharcigan.

Qod. 11aad

*(Dhaqan-gelid)*

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 15ka Abriile 1981, waxaana lagu soo saarayaa Faafint aRasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 Abriile 1981.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 35/Bis ee 18 Maajo 1981, Sharciga Baasaboorka iyo warqadaha Dhoofidda.

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO TIXGELINAYA : Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee G/Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA :

QODOBKA 1AAD

(Waajibnimada Baasaboorka)

1. Qof kasta oo muwaadin Soomaali ah oo doonaya inuu u dhoofo dibedda waa inuu sitaa Baasaboor.

2. Waxaa ka reeban waajibaadkaa dadka doonaya inay xuduudda ka gudbaan, adeegasho darteed, kuwaasoo khasab ku ah inay sitaan «warqadda xuduudda looga gudbo».

QODOBKA 2AAD

Hay'adaha Bixinta Baasaboorka)

1. Baasaboorka bixintiisa waxaa awood u leh :

a) dalka gudihiisa : Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda;

b) dibeddana : Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha.

2. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda wuxuu u wakiilan karaa bixinta Baasaboorka Caadiga ah Madaxa Waaxda Socdaalka;

3. Bixinta Baasaboorka Diblomaasiga ah iyo kan howleed waxay gaar u tahay Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

Qod. 3aad

(Noocyada Baasaboorka)

A. Baasaboorada waa seddexda nooc ee soo socda

1) Baasaboor diblomaasi ah;

2) Baasaboor howladeed;

3) Baasaboor caadi ah:

B. Baasaboorada kor ku sheegan ka sokow waxaa loo aqoonsan yahay warqadaha soo socda kuwo lagu dhoofi karo :

1) Dhaafiyaha;

2) Warqadda deg-degga ah ee dhoofidda;

3) Warqadda xuduudda looga gudbo;

4) Buugga badmaaxa.

QODOBKA 4AAD.

(Baasaboorka diblomaasiga ah)

1. Baasaboorka diblomaasiga ah waxaa la siinayaa :

a) Madaxa Qaranka, xubnaha Golaha Sare ee Kacaanka, xubnaha Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, Xildhibaannada Golaha Shacbiga, Wasiirrada, Wasiir ku-Xigeennada, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Toog-hayaha Madaxtooyada, Guddoomiyaha Bankiga Dhexe, Taliyayaasha Ciidamada Qalabka Sida iyo Saraakiisha Diblomaasiyiinta ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

b) Muwaadin kasta oo hawl siyaasi ah ama diblomaasi ah darteed dibadda u dhoofaya, isagoo matilaya Dawladda iyo shaqsiyadi kale ee loo garto.

2. Bixinta baasaboorada Diblomaasiga ah ee ku xusan (b) ee qodobkan, waxaa awood u leh Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

3. Baasaboorka diblomaasiga ah wuxuu qofku sidan kar aailaa iyo inta uu hayo jagada ku tilmaaman xarafka (a) ee qodobkan, wuxuuna soconayaa muddo ku siman labo sano, Wasiirka ama cidda u wakiisho ayaa leh awoodda cusbooneysiinta.

4. Baasaboorka diblomaasiga ah waxaa laga daayay canshuur nooc kasta ha noqotee, marka la bixinaayo, la cusbooneysiinaayo ama jildiga laga beddelaayo.

## QODOBKA 5AAD

### (Baasaboorka howleed)

1. Baasaboorka howleed waxaa la siinayaa shaqaalaha xayidka ah ee Dawladda iyo Ciidamadda Qalabka Sida oo hawl darteed ugu dhoofaya dibadda ama ka qayb galaya shirar ama seminaarro, ka dib marka la helo oggolaanshaha Madaxtooyada Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya.

2. Baasaboorka howladeed wuxuu soconayaa inta ay socoto muddada hawsha darteed loo bixiyay, hase yeeshee, kama badnaan karo muddo seddex sannadood ah, waxaana la cusbooneysiin karaa muddo la siman tan hore.

3. Baasaboorka howleed waxaa laga daayay canshuur nooc kasta ha noqotee, marka la bixinaya, la cusbooneysiinaayo ama jildiga laga beddelaayo.

4. Baasaboorka howleed waa in qofka sitaa lagala soo noqdo markay hawshu u idlaato iyo mar kasta uu faraayo sharcigan.

## QODOBKA 6AAD

(Baasaboorka caadiga ah)

1. Marka laga reebo xaaladaha uu qoraayo qod. 12aad ee sharcigan, baasaboorka caadiga ah waxaa lagu bixinayaa codsiga muwaadin kasta.

2. Codsiga baasaboorka caadiga ah ee ku socota Waaxda Socdaalka, ama safaaradaha iyo qunliyadaha marka dibadda la joogo, waa inuu ku lifaaqnaadaa :

1. Warqadda sugitaanka;
2. Warqadda caddeynta dambi la'aanta;
3. Warqadda Asluub wanaagga;
4. Dhoor sawir cusub ee weydiistaha.

3. Safaaradaha ama Qunsuliyadaha waxay ku dhaqmayaan inta la kari-karo xubinta 2aad ee qodobkan, waxayna weydiisan karaan warqado kale oo lagaga dhaqmo helidda Baasaboorka meesha ay ka furan yihiin.

4. Baasaboorka caadiga ah wuxuu soconayaa muddo seddex sannadood ah, waxaana la cusbooneysiin karaa seddexdii sannaba mar.

5. Sharciga ayaa tilmaamaya canshuurta dulsaaran bixinta, cusbooneysiinta iyo Jildi ka beddelka Baasaboorka caadiga ah.

## QODOBKA 7AAD

Dhaafiyaha)

1. Shuruudaha bixinta dhaafiyaha wuxuu la mid yahay kan Baasaboorka caadiga ah, marka laga reebo sida uu qorayo qodobkan.

2. Dhaafiyha waxaa la siin karaa qof kasta oo ku nool Jamhuuriyadda, kamana dhalanayso qofka la siiyey, hadduusan ahayn mawaadin Soomaali ah, xuquuqda Jinsiyadda Soomaaliyeed.

3. Dhaafiyaha bixintiisa waxay ku kooban tahay xaaladaha soo socda :-

a) Qofka doonaya inuu dibadda u dhoofo isagoo u socda hal dal keliya iyo dalalka uu sii marayo.

b) Qofka muslimka ah oo gudanaya waajibka xajka ama Cumrada.

4. Dhaafiyaha wuxuu soconayaa muddada safarka, hase yeeshee kama badnaan karo hal sano, lamana cusbooneysiin karo.

5. Sharciga ayaa xaddidaaya canshuurta dulsaaran bixinta iyo Jildi beddelka Dhaafiyaha.

QODOBKA 8AAD

Warqadda safarka ee degdegga ah)

1. Warqadda safarka ee degdegga ah waxaa bixinteeda leh Waaxda Socdaalka;

2. Warqadda safarka ee degdegga ah waxaa loogu talo galay xaaladaha degdegga ah oo qofka dhoofaya uusan oofin karin. waqti darteed warqadaha dhoofidda ee u dhigan Baasaboorka caadiga ah ama dhaafiyaha.

3. Waxa kale oo la siin karaa qofka ajnabiga ah ee dalkiisa ku noqonaaya kana lumay Baasaboorka dalkana ayan u joogin safaarad.

4. Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha waxay awood u leeyihiin bixinta warqadaha degdegga ah oo ay codsadaan muwaadiniinta dibedda deggan, rabana inay dalka ku soo noqdaan, haddii ayan sidan ama uu ka lumay Baasaboorka ama dhaafiyaha iyo mar allaale oo qof muwaadin ah amar ka bixid lagu soo rogay.

5 Sharciga ayaa xaddidaya canshuurta dulsaaran bixinta warqadda dhoofidda degdegga ah.

## QODOBKA 9AAD

(Buugga Badmaaxda)

Buugga badmaaxda oo ka mid ah warqadaha safarka, waxaa qaadashadiisa iyo habka maamulkiisa lagu dhaqaa Sharci gaar ah.

## QODOBKA 10AAD

(Warqadda xuduudda looga gudbo)

1. Warqadda looga gudbo xuduudda waxaa bixinteeda leh Waaxda Socdaalka.

2. Warqadda xuduudda looga gudbo waxaa la siin karaa keliya muwaadiniinta deggan xuduudda oo adeegasho ahaan uga gudbaaya xuduudda.

3. Sharciga ayaa xaddidaya canshuuraha dulsaaran warqadaha xuduudda looga gudbo.

## QODOBKA 11AAD

(Tilmaamaha lagama maarmaanka ah)

A) Baasaboorka ama Dhaafiyaha waa inuu ku qornaadaa :-

1. Magaca oo seddexan iyo tilmaamo la xiriira qofka,
2. Dalalka uu Baasaboorka ka socon karo;
3. Taariikhda la bixiyey iyo cusbooneysiinta ama Juldi beddelkiisa;
4. Magacyada dadka ku qoran Baasaboorka ama Dhaafiyaha ee la socda Qofka.

B) Dadka lagu qori karo Baasaboorka ee la safri kara qofka waxay ka koobnaanayaan keliya Xaaskiisa iyo caruurtiisa oo yar yar.

T) Marka sharcigan laga hadlaayo, dadka yar yar waxaa loola jeedaa qofka aan gaarin 18 sano.

## QODOBKA 12AAD

### diiddmo

Baasaboorka caadiga ah iyo warqadaha dhoofidda ee ku xusan qodobka seddexaad ee sharcigan, lama siin karo :

1. Qofka ka tagaaya dad uu sharci ahaan mas'uul ka yahay xannaanadooda, isagoon ku wareejin qof kalo.

2. Qofka isagoo ku jira xannaanada qof kale, aan ka helin oggolaansho xannaaneeyaha, ama marka la waayo oggolaanshaha Hay'adaha Garsoorka awoodda u leh.

3. Afada haddii uusan ka raali ahayn ninkeedu;

4. Qofka miyir la' oo maskaxda wax u dhiman yihiin;

5. Qofka ay ka taal dacwad ciqaab ah, kana helin idan hay'adaha garsoorka awoodda u leh.

6. Qofka galay dembi lid ku ah shakhsiyadda Dawladda gudaha iyo dibaddaba.

7. Qofka u shaqeeya Dawladda, haddii uusan ka helin oggolaansho Madaxtooyada.

## QODOBKA 13AAD

### (kala noqosho)

Hay'adaha leh bixinta baasaboorka waxay awood u leeyihiin in ay baasaboorka kala noqdaan, xataa haddii uu yahay mid muddadiisu socoto, marka qofka ay ka lunto shuruudaha bixinta baasaboorka ee sharcigu uu qoraayo.

QODOBKA 14AAD

(Cusbooneysiin)

1. Codsiga cusbooneysiintu baasaboorka nooc kasta ha noqdee, waxaa la hordhigayaa Hay'adaha ku shuqul leh bixintiisa, waana in la bixiyaa canshuurta dulsaaran.

2. Cusbooneysiinta baasaboorka caadiga ah waa inuu lifaaqnaadaa warqadaha ku xusan xubinta 2aad ee qodobka 6aad ee sharcigan.

3. Cusbooneysiinta baasaboorka waxaa qofka loo diidi karaa haddii ay jiraan xaaladaha uu sharcigu dhigaayo.

4. Cusbooneysiinta baasaboorka waxaa kaloo loo diidi kara qofkii isagoo dibadda jooga ay ku sugnaato inuu ku kacay fal lid ku ah midnimada iyo Qarannimada Soomaaliyeed.

5. Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha waxay ku dhaqmaayaan inta la kari karo xubinta 2aad ee qodobkan, waxaana weydiisan karaan warqado kalo ee lagaga dhaqmo meesha ay ka furanyihiin.

QODOBKA 15AAD

(Jildi beddelid)

1. Codsiga Jildi beddelka waxaa weydiisan kara keliya qofka baasaboorka ama dhaafiyaha uu ku qoran yahay, waana inuu ku lifaaqnaadaa:

a) Warqadaha ku xusan xubinta 2aad ee qodobka 6aad ee sharcigan ka sokow, tilmaamaana lambarka iyo taariikhda la bixiyey baasaboorka ama dhaafiyaha;

b) Dhowr masawir oo ay xaddideyso hay'adaha jildi beddelka la weydiistay;

t ) warqadda caddeynayso in uu la socodsiiyey hay'adaha amniga kana soo wareegtay muddo aan ka yareen 90 maalmood.

2. Canshuurta jildi beddelka waxay la mid tahay tan baasaboorka cusub.

3. Hay'adaha ku shaqada le hjildi beddelka waxay awood u leeyihiin in ilaa iyo seddex dalool laba 2/3 ay hoos u dhigto muddada uu qodobka tilmaamayo, haddii qofka uu ka lumay baasaboorka baahi safar deg-deg ahi soo gasho loona aqoonsado.

4. Safaaradaha ama qunsuliyadaha waxay ku dhaqmayaan inta la kari karo xubinta 1aad xarafka (a) ee qodobkan, waxaana weydiisan karaan warqado kale oo lagaga dhaqmo meesha ay ka furanyihiin.

## QODOBKA 16AAD

## JOOJIN

1. Wasiirka Arrimaha Dibadda, isagoo la tashaday Hayadaha amniga, wuxuu amri karaa joojinta bixinta baasaboorka caadiga ah iyo warqadaha safarka muddo aan ka badnayn hal sano, ama talo ka bixinta dalalka loogu dhoofi karo, haddii ay jiraan duruufo la xiriira xasiloonida guud iyo amniga gudaha ama dibadda ee Dalka.

2. Joojinta uu ka hadlaayo qodobkan laguma dhaqayo xaaladaha soo socda :

a) Qofka jirran oo dibadda daawo u aadaayo oggolaanshana ka haysta Guddiga takhaatiirta ee Wasaaradda Caafimaadka.

b) Qofka u socda tababar tacliineed ama takhasus oo Dawladdu oggolaato.

QODOBKA 17AAD

CIQAAB

Qof kasta oo ku xad gudba nidaamka sharcigan uu faraayo, isagoo ku daneysanaya ama qof kale ugu daneynaya ama ku kaca fal ka soo horjeedi nidaamka bixinta ama cusbooneysiinta Baasaboorka iyo dhaafiyaha, wuxuu galayaa dembi, wuxuuna ku muteysanayaa ciqaab ah hal sano ilaa shan sano oo xarig ah iyo Sh. So. 1.000 ilaa Sh. So. 20.000 oo gannaax ah, ama labaduba, haddii falka uu ku kacay qofkaasi aanu ahayn mid si caddaan ah ugu tilmaamaan xeerarka ciqaabta.

QODOBKA 18AAD

(Xeer-nidaamiye)

Madaxweynaha JDS wuxuu awood u leeyahay, isagoo arkay soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda, tixgeliyeyna oggolaanshaha Golaha Wasiirrada inuu soo saaro Xeer nidaamiye lagu faahfaahinoyo Sharcigan.

QODOBKA 19AAD

BURRIN

Waxaa la buriyey sharci ama xeer kata oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

QODOBKA 20AAD

DHAQAN GAL

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa 15 maalmood kaddib, marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 16 Maajo 1981

MADAXWEYNAHA J. D. S.

***S/Gaas Maxamed Siyaad Barre***

AMARKA Madaxweynaha JDS, L. 11 ee 28 Abriile 1981.

U go'id hawlaha Golaha Sare ee Kacaanka·

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY Qod. 83aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Amarka Madaxweynaha JDS lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980, kuna saabsan ku soo rogidda Dalka Xukunka degdegga ah;

MARKUU TIXGELIYEY ujeeddada dib ugu yeeridda Golaha Sare ee Kacaanka oo ahayd ka hortagga iyo habsami wax uga qabadka dhibaatooyinkii dhaliyey Xukunka Degdegga ah;

MARKUU ARKAY culeyska iyo mugga waajibaadk aGolaha Sare ee Kacaanka, lagama maarmaanna ay u muuqatay in Xubnaha Golaha Sare ee Kacaanka loo gacan banneeyo, si ay waqti buuxa ugu helaan, gudashada hawlaha la xiriira toosinta ujeeddooyinkii Kacaanka ee la qallooc'yey, isla markaana xilalkii kaloo ay ka hayeen, Xisbiga, Barlamaanka iyo Maamulka Dawladda looga hanto;

MARKUU DHEGEYSTAY Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Amarka soo socda:

Qod. 1aad

Laga billaabo taariikhda Amarkan, Xildhibaannada hoos ku tilmaamaan waxay u gacan bannaanaaneyaan hawlaha Golaha Sare ee Kacaanka:

1. S/Guud Maxamad Cali Samantar, Madaxweyne Ku-xigeenka 1aad ee Jamhuuriyadda iyo Wasiirka Gaashaandhigga;

2. S/Gaas Xuseen Kulmiye Afrax, Madaxweyne Ku-xigeenka 2aad ee Jamhuuriyadda;

3. S/Guuto Ismaaciil Cali Abokor, Guddoomiyaha Golaha Shacbiga;

4. S/Guuto Axmad Suleemaan Cabdalla, Lataliyaha Madaxweynaha Arrimaha Nabadgelyada iyo Taliyaha Ciidanka Nabadsugidda Soomaaliyeed;

5. S/Guuto Maxamad Sheekh Cusmaan, Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Golaha Shacbiga;

6. G/Sare Cabdirasaaq Maxamuud Abuukar, Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad Golaha Shacbiga;

7. G/Sare Axmad Maxamuud Faarax, Guddoomiyaha Hoggaanka Guud ee Idiyolojiyada iyo Xiriirka Dibedda;

8. G/Sare Muuse Rabiile Good, Guddoomiyaha Hoggaanka Guud ee Dhaqaalaha iyo Maaliyadda;

9. G/Sare Cusmaan Maxamad Jeelle, Guddoomiyaha Hoggaanka Guud ee Cilmi Baarista;

10. G/Sare Cabdulqaadir Xaaji Maxamad, Guddoomiyaha Hoggaanka Guud ee Abaabulka iyo Kicinta Bulshada.

Qod. 2aad

Xilalka ay banneeyeen Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Taliyaha Ciidanka Nabadsugidda Soomaaliyeed waxaa sii qabanaya, ku meel gaar ahaan, Ku-xigeennadooda.

Qod. 3aad

Xilalka ay banneeyeen Guddoomiyayaasha Hoggaamada Guud waxaa sii qabanaya, ku meel gaar ahaan, Guddoomiyayaasha Hoggaamada xil ahaan ugu toosan.

Qod. 4aad

Xilalka Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Shacbiga waxaa sii qabanaya, ku meel gaar ahaan, Xubno ay iska soo dhex doortaan Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu.

Qod. 5aad

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S., waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 28 Abriile 1981.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

AMARKA Madaxweynaha JDS, L. 12 ee 13 Maajo 1981.

Laalid dacwooyinka ijaarka guryaha ganacsiga.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY Qod. 83aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Amarka Madaxweynaha JDS lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980, kuna saabsan ku soo rogidda Dalka xukunka degdegga ah;

MARKUU DAREEMAY xasillooni la'aanta ka taagan guryaha lagu sameeyo ganacsiga iyo is qabadka badan ee Kireeyaha iyo Kireystaha ay joogto ahaanta iskala soo horjeedaan;

MARKUU ARKAY Xeerka Madaniga (Sharci lambar 37 ee 2dii Juun 1973) iyo Sharciga ilaalinta ijaarka guryaha hoyga ah;

MARKUU ARKAY in ay lagama maarmaan tahay in degedeg wax looga qabto dhibaatooyinka dhaqaale iyo bulsho ee ka soo dersi kara arrimahaas, dib u habeyna laabto shuruucda kirada guryaha ganacsiga si loo ilaaliyo danta Kireeyaha iyo Kireystaha;

WUXUU SOO SAARAYAA

Amarka soo socda:

Qod. 1aad

1. Ilaa iyo inta laga soo saarayo Sharciga dib u habeynta ijaarka guryaha ganacsiga, waxaa la laalay dhammaan dacwooyinka ijaarka iyo guri ka saaridda ee hor yaal Maxkamadaha Dalka, heer kastaa ha ahaadeene.

2. Waxaa kale oo la laalay dacwooyinka fulinta ee nooca guryaha kor ku sheegan la xiriira.

Qod. 2aad

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa marka u saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faarinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13 Maajo 1981.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

AMARKA Madaxweynaha JDS L. 13 ee 14 Maajo 1981.
Dheereen muddo cafis.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Amarka Madaxweynaha JDS, lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980, kuna saabsan ku soo rogidda Dalka xukun degdeg ah;

MARKUU ARKAY Amarka Madaxweynaha JDS, lambar 10 ee 14kii Febraayo 1981, kuna saabsanaa cafis guud iyo mid gaar ahaaneed oo loo fidiyey dadka Qaranka Soomaaliyeed dembiga ka galay, dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya dibeddiisana ku nool;

MARKUU TIXGELIYEY duruufaha ku heeran dadkaas qaar ka mid ah oo suurta gelin weyday in Dalka ku soo noqdaan muddadii qabtay ee saddexda bilood ahayd, kana billaabaneysay 14ka febraayo 1981;

MARKUU TIXGELIYEY in ay lagama maarmaan tahay in la tixgeliyo duruufahaas; muddadana la kordhiyo;

ISAGOO ISTICMAALAYA awoodda aan caadiga ahayn ee ku tilmaaman Qod. 83aad ee Dastuurka, tixgeliyeyna himilooyinka xukunka degdegga ah;

WUXUU SOO SAARAYAA

Amarka soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa lagu kordhiyey lixdan (60) maalmood oo hor leh muddadii loo qabtay in ay dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku soo galaan Dembiilayaashii iyo Eedeysanayaashii cafiska loogu fidiyey Amarka Madaxweynaha JDS lambar 10 ee 14ka Febraayo 1981.

2. Muddada cusub waxay ka billaabaneysaa 15ka Maajo 1981, waxayna ka dhammaaneysaa 15ka Luulyo ee sannadkan 1981.

Qod. 2aad

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxii-xo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 14 Maajo 1981.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY in Jeega dhumay oo lambarkiisu ahaa 521216, lagana s oosaaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad, kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 12.000, uu iska lahaa Sheekh Maxamed Maxamuud sida ku cad warqadda lamb. 2666, taariikhdu ahayd 27.5.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY Qod. 69 Sharciga lam. 29.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega lam. 521216 oo ku qoran magaca Sheekh Maxamed Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 12.000.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad, u beddelo Sheekh Maxamed Maxamuud, Jeega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maatinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27 Maajo 1981.

Guddoomiyaha Max. G. Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 670